

Khaa'imiin baa isku dayaya iney talaalka lacag ku qaataan.

Inta lagu jiro xilliga guga inbadan oo dadka ka mid ah baa la talaali doonaa. Waana lacag la'aan, laakin dad khaa'imiin ah baa bilaabay iney khiyaamaan dadka oo lacag kaga qaataan, booliiskuna wuxuu aaminsanyahay iney kasii dari doonto khiyaamada.

Dhammaan dadka qaangaadhka ah ee daggan Iswidhan ayaa la talaali doonaa lagana tallaali doono (covid-19) haddii ay doonayaan.

Hadda boolisku waxa ay ogaadeen iney jiraan khaa'immin doonaya iney khiyaameyaan dadka. Qaar wey ku soo wici doonaan oo ku dhihi doonaan samayso balanta talaalka lacagna bixi.

Ama waxa ay ku odhan doonaan si'aanu u hubsanno in aad tahay qofka saxda ah, fur oo gal bank-Id-gaaga.

Ha noqon qof la khayaameeyo:

- Waligaa ha gelin bank-Id-gaaga ama doosaha bangigaaga haddii qof kusoo waco.
- Hana bixinin weligaa nambarada kaarkaada bangiga.
- Sidoo kale ha bixinin nambarada iyo koodadka doosaha bangigaada.

Shirkadaha saxda ah, hay'adaha dawladda marna WELIGOOD kuma weydiinayaan hadey kusoo wacaan.

Haddii aad ka shakiso khiyaamo waxaa la rabaa

- Inaad telefoonka ku damiso
- Kala soco beyjka www.1177.se waxa gobolku samaynayo ama xarunta caafimaadkaada oo weydii.
- La xiriir degmada haddii guriga laguugu adeego ama laguugu daaweeyo.

Haddii lagu khiyaamay, ama qof isku dayay inuu ku khiyaamo

- Wac ama iimayl u dir bangigaaga si'ay kaaga caawiyaan in la joojiyo lacagta.
- La xiriir booliiska. Wac 112, hadii danbigu dhacayo xilligaa, ama 11414 haddii aad ka dacwooneyso danbi dhacay.

Ku caawi inaad soo sheetgo

Usheeg qoyskaada iyo asxaabtaada khaa'inimadaan, si ay isaga ilaaliyaan.

Xusuusnowna: IN TALAALKA CUDURKA COVID-19 UU LACAG LA'AAN KA YAHAY ISWIIDHAN!



Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa. Qoraalkan warbixinta ah waxaa soo diyaariyey, hay'adda xaaladaha degdegga ah ee gobolka. Hay'adda xaaladda deg degga ah ee gobolka Kalmar waa wada shaqeyn ka dhaxaysa dhammaan degmooyinka gobolka, gobolka, hay'adda caafimaadka ee gobolka iyo mas'uuliyiin kale oo gobolka ah. Markay xaalad deg deg ahi ka dhex dhacdo bulshada, si wada jir ah baynu isu caawinnaa.



facebook.com/krissamverkan.kalmar

Kalmar kommun

